
# Biyuhu waa Nolol | qʷu? ti dəxʷəshəli?

Waxaad u dhaxeysaa dhulka iyo badda. Jihada uu webigu u qulqulaayo, biyaha cusbada ee ka imaada Puget Sound iyo Elliott Bay ayaa ku milmaan webiga Duwamish. Jihada uu webigu ka soo qulqulaayo, biyo macaan ayaa ka soo qulqulaya Buuraha Cascade iyagoo soo dhex maraya biyo-biyoodka Green-Duwamish. Halkan gudaha dabarka, labaduba waxay isku daraan si ay u sameeyaan biyo dhanaan.

Shan nooc oo ka mid ah maleeyga salmon ayaa u soo guura webiga Duwamish gu' kasta. Waxay ku ilmo-dillaacsadaan biyo-mareenka waxayna ku dabaashaan jihada uu webiga ku sii qulqulaayo. Halkan waxay ku quudiyaan, magangal ka raadsadaan ugaarsadayaasha, oo ay la qabsadaan biyaha milixda ka hor intaanay sii aadin Puget Sound. Maleyga salmoon-ka waaweyn wuxuu mar kale maraa habkan dhamaadka meertada noloshooda, iyaga oo u hayaamaya korka ka dib seddex ilaa shan sano oo ay ku sugnaayeen deegaanka badweynta.

Nadiifinta deegaanka iyo dib u soo celinta deegaanka dabarka ee goobtan waxay ku xidhan tahay muuqaalka dhaqanka ee Webiga Duwamish.

Dib-u-soo-celinta waxay gacan ka geysataa caafimaadka iyo adkeysiga webiga iyo meertada nolosha malaayga salmon-ka, isagoo joogtaynaya bulshooyinka ku tiirsan.



University of Washington



Tom Reese


Dadka asaliga ah waxay kaluumaystaan oo u kalluumaysan jireen wabigan si waafaqsan wareegyada xilliyada ilaa wakhtiyadii hore, tobanaan kun oo sano. Qoryaha geedka kedarka ah ama baroosinka hemlock-ka ayaa calaamadeeyay goobo kalluumaysi oo wanaagsan. Kalluunka ayaa laga soo qaban jiray meelo gunno dhuudhuuban ah iyadoo la isticmaalayo maro tolmo leh, dabinnado alwaax u eg.

Hadda, shabaqyada khaaska ah ayaa loo isticmaalaa in lagu soo qabqabsado malayga salmon-ka ee waaweyn. Sagaal tiirar oo ku yaala meesha uu webigu ka soo qulqulayo ee dekada yar ayaa u adeegta si ah meelaha lagu xidho shabaqyadan. Habkani waxa uu taageeraa kalluumaysiga waara ee malayga salmon-ka ee qabiilka

"Iyadoo loo maraayo heshiisyada waxaan ilaalinay waxa noogu muhiimsan dad ahaan: Xaqa lagu soo dabto kalluunka salmon-ka ee aaggageena kalluumeysi ee dhaqaneed. Laakiin maanta mallayga salmon-ka wuu baaba'ayaa... la'aanteed ma jiro wax heshiis ah sax."
-Billy Frank, Guddoomiyaha Guddiga Kalluumeysiga Hindida ee Waqooyi-galbeed

Kalluunka ayaa loo dabtaa hab waafaqsan hab-dhaqaneedyada qabiilka kuwaas oo uu ilaaliyo heshiisyo dawladeed. Kalluumeysiga qabiileed ee mallayga salmon-ka waxaa lagu ilaaliyaa Heshiiskii Point Elliott ee 1855, oo ay la socdaan noocyo dabineed badan oo kale. Heshiiskani waxa uu si balaadhan u ilaalinayaa xuquuqda dhaqameed ee kaluumaysiga qabiilka iyada oo loo marayo "xaqa qaadashada kalluunka ee goobaha caadiga ah iyo saldhigyada caadiga ah."

Heshiisyada dhulka ee u dhexeeya dawladda Maraykanka iyo Qabaa'ilku waxay ka dhigan yihiin ballanqaadyo aan muran lahayn oo aqoonsanaya madaxbannaanida dhaladeed.



Tom Reese

"Malayga Salmoon-ku wuxuu muhiim u yahay taariikhda iyo nidaamka deegaanka ee Gobolka Washington. Qabiilooyin badan...waxay sii wadaan inay ku tiirsanaadaan malayga salmon-ka si u ah kheyraad cunteed iyo mid lama huraan u ah dhaqankooda iyo hab nololeedkooda."
-Tan iyo Waqtigii Sooyaalka: Qaranimada Qabiilka ee gudaha Gobolka Washington



Tom Reese

Isbeddelka cimiladu iyo culaysyada kale ee deegaanka ee ku imaaday mallayga salmon-ka waxay khatar gelinayaan dhaqanka qabaa'ilka waxayna khatar galiyaan xuquuqda heshiiska. Ilaalinta iyo soo celinta hababka deegaanka ee taageera xaaladaha deegaanka dabiiciga ah waxay sii wadi doontaa kobaca salmon ee mustaqbalka. Tirada salmoonka ee caafimaad qabta eena badan oo badan ayaa xaqiijineysa in heshiisyada la aqoonsan yahay lana sharfo, iyo in masruufka, hiddaha iyo dhaqanka ay u kobcaan dhammaan.